

Liiska Hubinta Warshadaha ee Hagidda Kahortagga COVID19

Cusbooneysiintii ugu danbaysay: *Juun 15, 2020*

Gobolka Maine wuxuu qaatay hannaan qorshaysan, oo ay ku taageerayaan sayniska, khibrada caafimaadka bulshada, iyo iskaashiga warshadaha, si loogu oggolaado ganacsatada Maine inay si nabadgelyo ah u furaan marka waqtigu ku habboonyahay. Qorshaha waxaa laga heli karaa www.maine.gov/covid19/restartingmaine.

Tani waa mid ka mid dukumiintiyada hagidda warshadaha badan ee Gobolka uu u diyaarinayo meheradaha si ay ugu diyaar garoobaan inay buuxiyaan tilmaamaha caafimaadka isla markaana si nabadgelyo leh dib ugu laabtaan. Fadlan hubi inaad dukumintigaan ku lammaanayso dukumantiga hagidda guud ee khuseeya dhammaan warshadaha, kaas oo laga heli karo maine.gov/decd.

Fadlan ogsoonow: Dukumantigan waa la cusboonaysiin karaa marka la helo macluumaad dheeri ah iyo illo.

Wejiga 1aad: Ganacsiyada tafaariiqda

Shaqaalaha

- Waxa looga baahanyahay shaqaalaha inay xirtaan marada wejiga daboosha oo ay qabatimaan fayodhawrka gacmaha oo ay la socoto gacmo-dhaqid joogto ah, gaar ahaan taabashada u dhaxaysa macaamiisha iyo qalabka macaamiisha.
- Halkii ay suurtagal tahay, samee wareejinta shiftiyada iyo nasashada cuntada si aad uga fogaato buuq.
- Hubi in shaqaaluhu ay 6 cagood (fiit) kala-fogaadan markasta oo ay suurogal tahay.
- Hagaaji kuraasta qolalka nasashada iyo aagagga kale ee caanka ah si aad uga tarjuntto ku dhaqanka kala-fogaynta jir ahaaneed.
- Mamnuuc isu-imaatinada ama kulamada shaqaalaha 10 ama ka badan inta lagu jiro saacadaha shaqada.
- U oggolow shaqaalaha inay fasax qaataan oo qaddo u qaataan bannaanka, ama meelaha kale ee kala-fogaanshaha jireed lagu heli karo.
- Ha u oggolaanin shaqaalaha cuntada ama cabitaanka goobta tafaariiqda.
- Xaddid is dhexgalka u dhexeeya shaqaalaha iyo booqdayaasha bannaanka ah ama darawalada gawaarida; hirgeli tababbarka helitaan la'aanta ah haddii ay suurtagal tahay.
- Hagaaji tababbarada/habdhaqannada sammuurada si loo xaddido tirada dadka ku lugta leh oo u oggolow kala-durugsanaanta 6 cagood; Adeegso tababbar ficil/muuqaal/maqal ah markii ay suurtagal tahay.
- Ka jooji shaqaalaha inay isticmaalaan taleefannada asxaabta, miisaska, goobaha shaqada, raadiyayaasha, qalabka gacanta/la xiran karo, ama aaladaha kale ee shaqada iyo qalabka.
- Sii shaqaalaha tababarka:
 - tilmaamaha kala-fogaanshaha jireed iyo waxyaabaha laga fillaayo
 - la-socodka caafimaadka qofka
 - xirashada, iska saarista, iyo tuurista habboon ee qalabka ilaalinta qofeed
 - dhaqidda daboolka wejiga iyo labiska sida hoos ku qoran

- habraacyada nadiifinta sida hoos ku qoran (ama siday qabto CDC)
- sida loola socdo caafimaadka qofka iyo heerkulka jirka marka guriga.
- hagidda ku saabsan sida loo dhaqo marada daboolka wejiga iyo diraysaka: [eeg CDC, Nadiifinta iyo Jeermis-dilka Qalabkaaga, Sida loo Jeermis-tirayo: dhaqid](#)
- habraacyada nadiifinta, ee ay ku jirto sida si ammaan ah oo wax ku ool ah loogu adeegsado qalabka nadiifinta.
- Tixgeli tababbarka shaqaalaha ee farsamooyinka badbaadada degdegga ah.

Macaamiisha

- Macaamiisha waa inay xirtaan maro daboosho wejiga.
- Ogeysii macaamiishaada siyaasadahaaga iyo habraacyadaada horay ee COVID, haddii ay suurto gal tahay.
- Calaamad ku samee meelaha laga soo galo iyo dhammaan dhismaha oo uga digaya shaqaalaha iyo macaamiisha xadka qaadka la oggolyahay, lix cagood oo ah kala-fogaanshaha jireed, iyo siyaasadda ku saabsan daboolka wejiga.
- Ku dhiirrigeli macaamiisha inay xaddidaan tirada dadka ay u soo kexeeyaan ganacsiga. Keli adeeggo markii ay suurto gal tahay.
- Taageer masaafada jireed ee u dhaxaysa macaamiisha iyo shaqaalaha adoo ka cabbiraya masafo ah 6 cagood (fiit) laga soo billaabo xisaabiyaha, miisaska adeegga, iyo goobaha iibka.
- Tixgeli rakibida carqalada plexiglass si loo kordhiyo kala-fogaanshaha jireed.
- Calaamad ku dheji haddii ay tahay inaad xaddiddo tirada alaabooyinka qaarkood.
- Tixgeli inaad siiso saacado hore oo gaar ah waayeellada iyo shakhsiyaadka kale ee khatarta badan ku jira.
- Ka diid dadka inay taabtaan badeecada aysan iibsanaayn.
- Tixgeli inaad habbayso saacadaha shaqada ee bakhaarka, hadba sida loogu baahdo, si loo taageero dadaallada kala-fogaanshaha bulshadeed iyadoo la yaraynayo saxmadda.

Hawlgallada

- Ganacsatada tafaariiqda waa inay xaddidaan wadarta qaadka bakhaarada ilaa 5 macaamiisha 1,000-kii fiit oo laba jibbaaran.
 - In kasta oo 5 qof 1,000 kiilo mitir oo laba jibbaaran ay tahay tirada ugu badan wakhtigan, mulkiilayaasha iyo maareeyayaashu waa inay tixgeliyaan qodobbada soo socda ee kordhin kara halista gudbinta dhismahooda isla markaana waxay go'aansan karaan inay dejiyaan xaddidaad hoos u dhac ah, sida 3 1,000-kii fiit ee laba-jibbaaran ba, haddii xaadirkan:
 - Hawo xumo, tusaale ahaan hawo yar oo wareegaysa dibedda
 - meelo xaddidan oo ka dhigaya kala-fogaanshaha bulshada wax adag. galinta jidhka ku adkeysta
- Keen calaamado masafo oo ku yaal bannaanka dukaanka waqtiyada marka xadka qaadka ay dhaafto; Tani waxay u oggolaanaysaa saf iyadoo la ilaalinaayo kala-fogaanshaha jireed; shaqaalaha sidoo kale ayaa la qoran karaa si ay uga caawiyaan macaamiisha sugitaanka inay soo galaan.
- Tixgeli siyaabaha lagu badin karo qulqulka hawada, haddii ay macquul tahay, si loo kordhiyo wareegga hawo-mareenka cusub (tusaale ahaan furitaanka daaqadaha, ama albaabada)
- Fiiro u yeelo in shaqaalaha ama macaamiisha adeegsada wiishashka ama wixiyeyaasha ay u baahan doonaan feejignaan joogto ah oo ah tilmaamaha kala-fogaanshaha jireed iyo nadiifinta joogtada ah ee meelaha sare ee taabashada.

- Yaree meelaha taabashada ee la wadaago sida kiosk, taabladada, qalimaanta, kaararka dhigista, rasiidhada iyo furayaasha.
- Samee qaab si joogto ah loo jeermis-tirayo alaabada iyo agabyada dhowaan la keenay.
- Samee nidaam loogu talagalay maaraynta iyo socodsiinta dhoofinta iyo rasiidhada (oo ay ku jiraan jeermis-tirka).
- Kula tali shaqaalaha, qandaraaslayaasha, wadayaasha gawaarida, iyo iibiyaasha in looga baahan yahay Amarka Wareegtada #49 FY 19/20 inay xidhaan maro daboosho wejiga inta ay joogaan dhismaha.
- Ogeysii iibiyaasha dibu furista, iyo nidaam kasta oo dib loo eegay sida ay ula xiriirto soo gelitaanka, keenidda, waraaqaha, iwm.
- Tixgeli hirgelinta tallaabooyinka lagu xaqiijinayo badbaadada iibiyaha, oo ay ka mid yihiin:
 - Joojinta/hakinta gelitaanka (tus. ka joojinta dhammaan dirawalada aan shaqaalaha ahayn inay soo galaan dukaamada, bakhaarada, iyo warshadaha waxsoo-saarka).
 - Ku-wareejinta saxeexyada aan la istaabanayn/saxeexyada iimaylka ee keenidda.
 - Halkii ay macquul tahay, habbaynta kaso-gudbinta daaqadaha dukaanka si ay u fidiso gaarsiinta.
- Weydiiso in iibiyaasha galaya goobaha dukaankaaga ay toos ugu sheegaan shaqaalahooda inay raacaan dhammaan tilmaamaha kala-fogaanshaha bulshada iyo amarada caafimaadka ee ay soo saareen mas'uuliyiinta dowladda ee ay khusayso.
- Uga baaho nadaafad joogta ah iyo nadaafadda meelaha taabashada dusha sare sida musqulaha, albaabbada, pambooyinka PIN, iyo meelaha la wadaago ee ay marin u heli karaan shaqaalaha, macaamiisha, iyo alaab-qaybiyayaasha.
- Hubi in saacadaha shaqada ay shaqeeyaan u oggolaanayso waqtiyada u dhexeeya saacadaha shaqada nadiifin dhammaystiran.
- Sii qalabka nadiifinta, sida masaxadaha nadiifinta, shaqaalaha si ay ugu nadiifiyaan qalabka gacanta/la xiran karo, iskaanka, raadyaha, ama aaladaha kale ee shaqada iyo qalabka kahor/kaddib isticmaalka.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil meelaha taabashada ee dusha sare ah. Gawaarida iyo dambiilooyinka waa in la nadiifiyaa oo jeermiga laga dilaa inta u dhaxaysa isticmaal kasta oo macmiil ah.
- Tixgeli inaad siiso nadiifinta "xirmooyin" ay ka mid yihiin tirtirayaasha jeermiska dila ama buufimaha, gacmo-gashiyada la tuuri karo, tuwaallo waraaq ah, daboolka wejiga ee marada ah, gacmo nadiifiyeyaal iyo sahayda kale ee nadaafadda ayaa si sahal ah looga heli karaa dukaanka oo dhan, oo ay ku jiraan barxadaha iibka iyo saldhigyada kale ee si joogto ah loo nadiifin doono maalinta oo dhan. .

Wax-iibsiga

- Kor uqaad Ikhtiyaariyada Dukaamaysiga “Aan la istaabanayn”
 - Ku dukaamaysiga onlayn
 - Ikhtiyaarka lacag-bixinta aan la istaabanayn (tusaale, kaararka dhigista iyo qaadashada ee RFID, Apple Pay, Google Pay, iwm.)
 - Is-hubinta nafeed
 - Adeegyada qaadista iyo gaarsiinta
- dhaq gacmaha ama isticmaal nadiifiye aalkolo ku salaysan (at. ugu yaraan 60% aalkolo) kadib markaad gacanta ku qabato lacag caddaan ah.
- Xusuusnow isticmaalka bacaha dib loo isticmaali karo ee macaamiisha waqtigan looma ogola.
- Tixgeli inaad kordhiso saacadaha qaadista si loogu adeego macaamiisha badan ee onlaynka.

- Joogtee kala-fogaanshaha jireed jirka oo ay ku jirto goobihii iibka kale ee shaqada

Soo celinta iyo Isweydaarsiga

- Tixgeli hakinta ama wax ka beddelka siyaasadaha soo celinta iyo isweydaarsiga.
- Samee nidaamyada habbaynta, maaraynta, jeermis ka dilka, iyo kaydinta soo celinaha la soo celiyo ee go'doon waqti cayiman kahor intaadan ku soo celinin dabaqa iibka.

Qolalka Ku-habboon

- Qolalka ku-habboon waa inaysan furnaan wakhtigan.

Tixgelinta Kale ee Hawlaha Kale

- Ballaadhi aaggaga saxmadda sare illaa xadka kaydinta dukaanku oggolyahay.
- Xusuusnow meelaha nadaafadda ah ee diiradda la saarayo ganacsiga tafaariiqda waxaa ka mid ah:
 - Dukaameysiga gaari gacanka iyo salladaha.
 - Gacanta albaabka iyo khaanadaha.
 - Nalalka iyo damiyayaasha kale ee korantada (tixgeli calaamad u samaynta si ay nalalka u sii hayaan had iyo jeer, ama u isticmaalaan awoodda dareemayaasha dhaqdhaqaaqa bannaanka).
 - Aaladaha la wadaago sida kiishka qoryaha, qaadaha alaabta, koolada, sanduuq jarjaraha, iwm.
 - Kuraasta, miisaska, iyo kuraasta dhaadheer.
 - Qaboojiyaha, mikrowaafka, iyo waxyaabaha kale ee had iyo jeer la taabto iyo sagxadaha qolka shaqaalaha.
 - Saacadaha wakhtiga
 - Bar tilmaameedka iibka/hubinta-bixinta:
 - Diiwaan hayaha lacagta, oo ay ku jiraan shaashad taabashada, batoonnada, mawska.
 - Xirmooyinka PIN (shaashadda taabashada, botoomada, iyo qalin).
 - Xisaab hubiyaha iyo/ama suunka wax lagu qaado.
 - Hubiyaha qaybta
 - Musqulaha
 - Saxanka musqusha, hayaha warqadda musqusha, iyo kabaalka daadinta.
 - Waasakada iyo furaha qasabada
 - Hayaha waraaqaha tuwaalka iyo/ama qallajiyayaasha hawada.
 - Goobaha lagu beddelo xafaayadaha
- Xusuusnow mashiinnada iibinta laguma talinayo wakhtigan iyadoo ay ugu wacantahay caqabadda ah ku ilaalinta sagxadaha nadiif.
- Ku sii dukaanka dhexdiisa gacmo-nadiifiye ay adeegsadan macaamiisha iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan soo-gelinta dukaannada, iyo hubinta..
- Ka saar wixii waraaqo ah, xaashiyaha iibka, liisaska qiimaha ee ay macaamiisha badan la wareegi karaan haddii aan loogu talogalin isticmaal keliya.
- Tixgeli dariiq yar oo hal dhinnac ah haddii ay suurto gal tahay.
- Jooji rugaha cuntada ee 'isku-adeegidda' iyo qaybinta cuntada ama alaabada daryeelka shaqsiyeed.
- Ka saar alaabada 'tijaabada' ah sida looshinka gacanta ama cadarka.
- Kula tali inaad u ogolaato keliya xayawaanka adeegga inay waqtigan ganacsi ku jiraan.
- Iska ilaali dhacdooyinka/xayeysiinta gaarka ah ee u soo jiidi karta dadweyne fara badan ganacsiga hal mar.

Nidaamyo gaar ah oo loogu talogaley Shaqaalaha Gaarsiinta Guryaha/Rakibaadda

- Xiro daboolka marada wajiga ee ilaalinta ah inta lagu gudajiro gaarsiinta guriga iyo/ama adeegyada rakibaada.
- Dhaq gacmahaaga ama isticmaal nadiifiye aalkolo leh oo ku salaysan aalkolo (ugu yaraan 60% aalkolo) inta udhaxaysa gudbinta
- Hubi kala-fogaanshaha bulshada ee saxda ah ee u dhexeeya shaqaalaha iyo macaamilka.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil sagxad kasta taas oo si joogto ah loo taabtay muddada rakibaad kasta.
- Marka gaarsiinta/rakibaadda ay dhamaato, nadiifi oo jeermiska ka dil dhammaan dusha sare ee lala xiriiray inta lagu gudajirey rakibaadda.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil aalad kasta oo agab ah ama agab kasta oo loo adeegsado keenista/rakibaadda oo dhan marka aad guriga ka baxdo.

Foomka Ka-hortagga COVID-19

Si loo furo, meheradahu waa inay ballan qaadaan inay u hoggaansan yihiin shuruudaha liiska hubinta iyagoo buuxinaya foomkan gaaban ee onlaynka ah. Fadlan ogsoonow in ururada diinta iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee shaatiga leh aan looga baahnayn inay isticmaalaan foomkan.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan nagala soo xiriir businesss.answers@maine.gov ama [meherka1-800-872-3838](tel:1-800-872-3838).